**Sharciga 10 Jannaayo, 1960, lamba. 1 diiw.**

**Canshuurta ku waajibeysa qoraallada mucaamalo oo lageynayo diwaanka Guud, ee Baabuurta**

## MAAMULUHU

Markuu arkay oggolaanshaha Golaha Xeerdejinta;

## WUXUU GUDDOMINAYAA SOONA SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qod. 1

Qoraallada oo marka loo eego xeerarka jira ay tahay in la qaado sí loo sameeyo qaabka qoritaanka iyo ku xusuus-qoridda diiwaanka guud ee Baabuurta, waxaa lagu qorayaa xaashi boollo lehoo loo jideeyey qoraallada guud iyo gaar, waxayna u suuban yihiin diiwaangein muddada sharciga gooyey gudahood ee la xiriira isuduwidda canshuuraha laga qaado wixii mucaamalo.

### Qod. 2

Nuqulada xaashiyaha diiwaanka Diiwaanka Baabuurta Dadweynaha iyo waxyaabaha laga minguuriyey, shahaadooyinka, xitaa kuwa tabanaha ah, ee la xiriira iyo noocyada kala duwan ee qaababka, waxaa lagu soo saaraa warqadda bollada ee loogu talagalay ficillada qaab maamul dowladeed. Haddii taasahaas lagu dhaqaaqp ayada oo la dabbaqayo sumadaha boollada, canshuuraha la loo baabiíyo sí sharciga waafaqsan.

### Qod. 3

Qoraallada guud iyo kuwa gaar ahaaneed, caddeymaha xitaa haddii la tasdiiqay, oo la socda iibka afa-ahaan lagu galay, macaamilooyinka, xukunnada iyo góaannada ku lug leh wareejinta baabuurta, waa ku laasin canshuuraha lagu dejiyey jadwalka ku lifaaqan.

### Qod. 4

Qoraallada sharci iyo xukunnada guntaya (unkaya), wax-ka- beddelaya , wareejinayana xuquuqda manfaceysiga ama ku-dhaqanka baabuur (gaari); kuwa macaamilka iyo ka-tanasulidda xuquuqda laftooda, ama qoraallada mucaamilo saanyoodka qaybsiga baabuurta, waxa ay ku khasban yihiin in ay bixiyaan canshuuraha ku xusan qaaimada kulifaaqan, oo hoos loo dhigay ilaa rubuc.

### Qod. 5

Qoraallada mucaamalo oo soo socda waxay u khaduucayaan canshuurta diiwaangelinta boqolkiiba hal qadarka amaahda iyo raacsayaasha (wicii raacsan):

a) — sameynta rahanta sharciga iyo midda heshiis oo loo dhigayo baabuur sí loo dammaanad-qaado ammaah;

b) — xusuus-qorista wareejinta amaahda lagu dammaanad-qaaday rahan ahaan loo dhigay baabuur;

c) — xusuus-qorista xusuus-qoridda ku-wareegidda uu qof saddexaad ku wareego xuquuqda amaahlaha (deyn bixiyaha);
d) — xusuus-qorista beddelidda deynsanaha, ayada oo lagu beddelayo deynsane kale, ha wehliso ama yeysan wehlin la cusbooneysiinta amaahda;
e) — xusuus-qorista (xusuus-qoridda) amaada oo rahan ahaan loo dhigo ama mucaamilooyin kale oo ay la socoto dammaanadda dulsaaran baabuurka.

Qoraallada mucaamalo oo ay ku jirto wareejinta isku marka ah ee baabuurka iyo saaran qiimaha (sicirka) bixintiisa dibloo dhigay, waxa ay khuduucayaan canshuurta u roon Maamulka ee u dhexeysa tan la xiriirta wareejinta baabuurka, ee ku xusan qodobka 4aad, ee hore, iyo tan diiwaangelinta mudnaanta, ee ku xusan qodobkan.

**Qod. 6**

Qoraallada mucaamaloyinka keenaya dib-u-cusbooneysiinta rahanta waxay u-khaduucayaan canshuurta go'an ee Sh. So. 10, - (10 Shilin soomaali).

**Qod. 7**

Qoraallada Mucaamalooyinka, bayaannada oo uu soo-saaro amaahlaha, ee xagga tirtirista (tirtiridda) diiwaangelinta canshuuraha, ha wehliso ama yeysan welinin cadeynta rasmiga ah ee rasiid, waxay u khuduucayaan canshuurta dheellitiran oo ah qadar dhan 0.50 boqolkiiba oo koreysa tirada lacagta oo qaabka loogu baahan yahay.

**Qod. 8**

Canshuuraha uu tilmaamayo jadwalka ku lifaaqan Sharcigan waxa ay u-khuduucayaan xataa wareejinta baabuurta sabab geeri awgeed. Cashuurtaani waxay nuugtaa cashuurta dhaxalka.

Si loo helo xusuus-qoris, waxaa lagama maarmaan ah in la soo saaro qoraal ay ku asteysan tahay in arrinta ay tahay mid la wada-ogyahay oo uu sameeye nootaaye oo caddeynaya in wareejintu ku timid geeri awgeed iyo caddeyn ka timid xafiiska aruurinta canshuuraha oo caddeyneysa in dhaxalka la soo sheegay iyo bixinta cashuurtii ku waajibtay.

**Qod. 9**

Sí loo dabbaqo canshuuraha uu sharcigu farayo waxaa lagu dhaqayaa axkaamta uu dhigaayo xeerka nidaamka canshuuraha laga qaado mucaamilaadka xataa xagga wixii ku saabsan ciqaabaha iyo muddooyinka taqaadumka (gubashada) iyo dhicitaanka xuquuqda, iyo weiliba xallinta khilaafaadka kadhalan kara (aloosmi kara) dhabbaqaadda axkaamtaas.

**Qod. 10**

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa shan iyo toban maalmood kadib markii lagu nashriyo Faafinta Rasmiga ah ee Soomaaliya.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Ururinta Rasmiga ah ee Sharciyada waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga ah. Cid kasta oo mas'uul ka ah waxaa ku waajib ah inay ilaaliso oo ay u dhaqan galiso sida sharci Soomaaliyeed.

Taariikhda Muqdisho, maanta oo ah 1da Janaayo 1960.

P. Maamulaha

**Gasbarri**

Wasiirka Kowaad
**Cabdullaahi Ciise** Maxamuud

Wasiirka Lacagta
**Cusmaan Axmed Roble**

## JADWALKA

| Dabeecadda qoraalka mucaamalada dhalineysa qaadidda canshuurta | Cansh-uurta góan | Cashuur tadhelliti ran | Habka bixinta iyo xusuusqoridda |
|---|---|---|---|
| Ka hor inta aan la diiwaangelin baabuurka ha ahado mid loogu talagalay xamuulka dadka ama alaabta, oo ay ku jiraan dhugdhuglayaasha, mooto-iskuuterrada, mootada karooseriyada leh, iyo mootada-qafilan iyo wixii la mida. | | 1% | Canshuurta waxaa lagu dabbaqayaa sicirka oo ka koobanaaa: qiimaha iyo nooliga, ee baabuurka, ayada oo heshiiska loo sheegayo tiraab ahaan, oo uu wehliyo nuqul tasdiiqan oo ay bixisay shirkadda iibisada ah, tiraab ahaan loo sheegayo heshiiska, oo ay dhiku xiran tahay nac kaga taal caddeynta Dekedda (Furdada) oo marag-muujineysa qiimaha lagu saleeyey xisaabta xagga saameynta dekadeed. Qaddarka canshuurta ka soo xasileysa marka la dabbaqo halbeeggan kama yaraan karto canshuurta góan oo loo dejiyey wareejinta isla nooca baabuurka. . |
| Wareejinta baabuurta loogu talagalay xamuulka dadka, marka laga eego xagga xoogga: | | | Ayada oo la diiwaangelinayo |
| a) ilaa 12 XF | 60 | | |
| b) ka badan 12 ilaa 14XF | 90 | | |
| c) ka badan 14 iyo ilaa 18 XF | 100 | | |
| d) ka badan 18 iyo ilaa 23 XF | 150 | | |
| e) ka badan 23 iyo ilaa 30 XF | 200 | | |
| f) ka badan 30 XF | 250 | | |

**Jadwalka ayaa socda**

| **Dabeecadda qoraalka mucaamalada dhalineysa qaadidda canshuurta** | **Cashuurta góan** | **Cashuurta dheellitiran** | **Habka bixinta iyo xusuusqoridda** |
|---|---|---|---|
| Wareejinta baabuurrada wershadaha, oo uu qaadkoodu yahay: | | | |
| a) ilaa 5kt | 60 | | |
| b) ka badan 5 iyo ilaae 10kt | 70 | | |
| c) ka badan 10 iyo ilaa 15kt | 100 | | |
| d) ka badan 15 iyo ilaa 20kt | 120 | | Ayada oo la diiwaangelinayo. |
| e) ka badan 20 iyo ilaa 30kt | 150 | | |
| f) ka badan 30 iyo ilaa 40kt | 180 | | |
| g) ka badan 40 iyo ilaa 50kt | 200 | | |
| h) ka badan 50 iyo ilaa 60kt | 280 | | |
| i) ka badan 60 iyo ilaa 70kt | 300 | | |
| j) Wixii ka badan 70kt | 350 | | |
| Wareejinta mootada qafilan, oo qaadkeedu yahay: | | | Ayada oo la diiwaangelinayo. |
| a) ilaa ....................5kt | 50 | | |
| b) ka badan ...........5kt | 70 | | |
| Wareejinta rimoorrada, qaadkoodu yahay: | | | Ayada oo la diiwaangelinayo |
| a) ailaa....................15kt | 100 | | |
| b) ka badan 15 ilaa .....50kt | 150 | | |
| c) ka badan 50kt | 200 | | |

**Jadwal ayaa socda**

<table>
<tr><th>Dabeecadda qoraalka mucaamalada dhalineysa qaadidda canshuurta</th><th>Cashuurta góan</th><th>Cashuurta dheellitiran</th><th>Habka bixinta iyo xusuusqoridda</th></tr>
<tr><td rowspan="2">6) wareejinta autobus si gaar ah loogu soo saaray ujeeddadaas:<br>a) qaadidda ilaa......... 15 qof<br>b) qaadidda ka badan 15 qof<br><br>Qoraallada wareejinta waa in lagu guuriyo tilmaamaha lagu ay sifeeyeen qoraallada farsamo oo ku cad ruqsada (leysanka) wareegga oo muujinaya lambarka astaanta matoorka, telaayada, xoogga oo lagu sheego XF iyo qaadka wax-ku-oolka oo ah kt, baabuur kasta, oo loogu talagalay xamuulka alaabta, xagga autobuusyada, haddii xogta ku saabsan tirada dadka oo idmay in uu qaado (saaro) aysan ka muuqan ruqsada wareegga (socsocodka), caddeyn u gaar ah oo ka soo baxday xafiiska oo ka taariikh horreysa tijaabadooda Kalawdadooda.</td><td>80<br><br>150</td><td></td><td rowspan="2">Ayada oo la diiwaangelinayo.<br><br>Canshuurtaas waa waajibaysaa, ayada oo ka bannaan tan laga bixiyo xukunka bixinaya xuquuqda la soo sheegay.</td></tr>
<tr><td colspan="2">Isla canshuurta ka ratibmeysa wareejinta caadiga, oo la dhimay 1/4 (rubac)</td></tr>
</table>

**Jadwal ayaa socda**

| **Dabeecadda qoraalka mucaamalada dhalineysa qaadidda canshuurta** | **Cashuurta góan** | **Cashuurta dheellitiran** | **Habka bixinta iyo xusuusqoridda** |
|---|---|---|---|
| 8). Qoraallada la xiriira unkidda wixii mudnaan sharci iyo mid heshiisba ah oo dammaanad u ah amaahyo ay dammaanad u tahay mudnaan ku dul leh baabuur, qof saddexaad oo ku wareegay xuquuqdii amaahlaha, deynsane lagu beddelay mid kale ha ogolaado ama yuusan oggolaan amaahlahii dhigay rahanta guurta ee amaahda ama mucaamalo kale, oo guntaysa amaahda ayna wehliso dammaanad dul-saaran baabuurka. | | 1% | Ayada oo la marayo diiwaangelinta qoraalka. Haddii wareejinta baabuurka iyo dhigidda (unkidda) mudnaanta qiimaha sicirka) dib loo dhigo, canshuurta waajibeysa kama yaraan karto tan loo gooyey wareejita kama dambeysta oo isla ayagaas. |
| 9). Qoraallo keenaya cusbooneysiinta mudnaanta.<br>. | 10% | | Ayada la maro diiwaangelinta qoraalka |
| 10). Qoraallo iyo caddeymo uu amaahluhu u bixiyo Atti dichairazioni relaciate dal Creditore per laxagga tirtiridda diiwangelinta mudnaanta, ha raacsanaadaan ama yeysan raacsiisnaanin caddeymo rasiid. | | 0.50% | LA MID AH<br>Canshuurta waxa ay ku jaan-goán tahay qaddarka mudnaanta qoran |